

# Naso

## Sida loo noqdo Taageerada Waajibka ee Looga Hortago Ka Warbixinta Badan iyo Beenta ah

Kahor inta aanad warbixinta gaadhsiinin DCYF, wakhti qaado aad ku fahmayso taariikhda buuxda ee qoyska iyo saamaynta ay ku yeelan karto iyaga.

### Qaababka aad u taageeri karto halkii aad kasoo warbixin lahayd

#### Miyaa qoysku u baahan tahay taageero dhaqaale?

Sheeg macluumaadka oo ku dhiiri geli inay doontaan barnaamijyada kaalmada dhaqaale. Taas waxaa ku jiri karta:

- Xarumaha Xogta Qoyska
- Kaydka Xafaayada
- Barnaamijka Nafaqada Women, Infants, and Children (Dumarka, Sabiga iyo Caruurta, WIC)

#### Maxay waalidku aad uga warwarsan yihiin?

Fasalada waalidnimo ee lagu taliyo ama khayraadka la talinta sida:

- Xarumaha Xogta Qoyska
- Barnaamijka Local Parent 2 Parent
- Parent Trust
- Help Me Grow

#### Miyaa ilmuhu muujiyay isbedel habdhaqanka ama dhaawac yar oo shil uga yimid?

Waxaa loo baahan karaa gudbin caafimaad ama la socodka latalinta dugsiga ama dhakhtarka cilmi nafsiga ilmaha si uu u hago bixiyaha caafimaadka.

Ka eeg Adeegyada Gudbinta Caafimaadka Maskaxda Seattle Children's ee Caruurta iyo Dhalinyarta [www.seattlechildrens.org/clinics/washington-mental-health-referral-service](http://www.seattlechildrens.org/clinics/washington-mental-health-referral-service)

### Xaaladaha Ilaalinta si Loo Yareeyo Tacadiga iyo Dayacaada

Xaaladaha Ilaalinta Xoojinta Qoyska waxaa weeye qaab daraasad lagu sameeyay oo ka kooban shan xaaladoodo oo muhiim ah.

Ka caawinta qoysaska dhismaha xaaladaha si loo xoojiyo, loo hormariyo korniinka ilmaha, oo loo yareeyo khatarta tacadiga iyo dayacaada ilmaha. Hadii waalidka ay ku adkaato wax kamid ah xaaladahani, isku day inaad ku xidho khayraadka.



#### Aqoonta Waalidnimada iyo Korniiinka

**Ilmaha/Dhalinyarta:** Miyuu garanayaa waalidku meesha uu ka heleyo xirfadaha waalidnimada iyo korniinka hormarka ilmaha?



**Taageero la Taaban karo:** Miyuu waalidku garanayaa meesha uu u doonanayo kaalmo?



**Adkaysiga Waalidka:** Miyuu waalidku ka gudbi karaa wakhtiga adag?



**Isku Xidhka Bulsho:** Miyuu waalidku garanayaa dad garanaya oo taageeri kara?



**Hormarka Bulsho iyo Dareen:** Miyuu waalidku garanayaa sida uu uga caawinayo caruurta inay ka hadlaan dareenkooda?



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## Khayraadka

- Liiska dhamaystiran ee dariiqooyinka loo taageeri karo booqo: <https://dcyf.wa.gov/safety/mandatory-reporter-resources>
- Si aad ugu xidho qoyska khayraadka, ula wadaagto Hagaha Khayraadka Bulshada Baahida Aas Aasiga ah ee DCYF: <https://dcyf.wa.gov/services/housing-basic-needs/basic-needs-community-resource-directory>

### Bushqada Ka Warbixiyaha Waajibka ah



Ka eeg Bushqada Ka Warbixiyaha Waajibka ah oo dhamaystiran adiga oo booqanaya <https://dcyf.wa.gov/safety/mandatory-reporter> ama iskaan garaynaya QR koodhka.

## Sida Looga Hortago Ka Warbixinta Badan iyo Beenta ah

**Ka warbixinta beenta ah** waxay dhacdaa marka macluumaadka majaro habaabin, ku xumayn, ama khadlan looga warbixiyo si ula kac ah ama kama ah.

### Tusaaleyaal

- Bixinta warbixinta beenta ah si ula kac ah
- Ka warbixinta xogta aan marka hore inay run tahay la eegin
- Ku xumayn ama wax ka bedel sida, buun buuninta macluumaadka si loo abuuro walaac aan jirin ama qalditaanka xogta
- Ka warbixinta xogta qadlan, hadii ay ka timaado qayrul masuulnimo, eex ama waxyeelo loo kasay

## Warbixinta badan ayaa dhacda marka mushkilad wax badan ama si aan saxnayn looga warbixiyo, taas oo keenta:

- Abuurista xaalad runta aan ku qotomin.
- Digniin aan loo baahnayn oo keeni karta talaabooyin xog khaldan looga duulay.
- Saamayn xun, gaar ahaan majaro habaabinta bulshooyinka, sida caruurta iyo qoysaska Madawga/Maraykanka Madaw iyo Hindida Maraykanka/Dhaladka Alaska (AI/AN).

### Sababaha Guud ee Keenta Beenta ama Warbixinta Badan:

- Yaraanshaha macluumaadka ama fahanka.
- Eex ama aragtida uu ruuxu qabo oo "xogta" kaga qasanta.
- U gudbinta xogta khaldan iyada oo lagu doonayo in dano shakhsi ahaaneed lagu gaadho.

### Raadka:

- Ciqaabta sharci (RCW 9A.84.040).
- Cidhiidhi dareen iyo dhaqaale oo ay ku keento qoysaska ay arrintu khusayso.
- Walaac khasaaro oo shakhsiyaadka iyo hay'adaha ah.

### Kahortaga Ka Warbixinta Beenta

- In la xaqiijiyo xogta inay saxan tahay kahor inta aan la gudbin.
- Iska ilaalinta aragti ka qaadashada iyo kala saaritaanka xanta/kutiri ku teenka runta.
- Dhiigi gelinta ka warbixinta sax ah ee aan anshaxa baal marsanayn.
- Wacyi gelinta ku saabsan saamayn sharci iyo bulsho ee ka warbixinta beenta iyo buun buuninta.

